

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Gaadiidka daryeelka caafimaadka

Habka gaadiidka ugu jaban waa in mar kastaba la adeegsadaa marka gaadiiska daryeelka caafimaadka la raacaayo. Taas waxa ku jirta gaadhiga, tareenka iyo tagsiga. Gaadhiga adeega waxa la isticmaalayaa marka ay jirto sabab sidaa loo sameynaayo.

Markaa ayaan gaadiidka daryeelka caafimaadka uuna shaqeyneyn?

Hadii uu qofku iska baxo kalidii iyo marka la raadsanaayo daryeel caafimaad oo tabaruc ah, tusaale markaad ka raadsanayso daryeel caafimaad meel ka baxsan kuwa ay Golaha Deegaanka ee Kronoberg bixiso eek u jira xiliga damaanada daaweynta laguuma soo celin doono lacagta safarka daryeelka caafimaadka.

Safarka guriga

Si wax laguugu soo celiyo safarkaaga daryeelka caafimaadka ee aad gurigaaga ku tageyso, iyadoon loo eegayn sidaad u safartey, risiidhka bixiyaha daryeelka caafimaadka waa inuu shaqaalaha daryeelka caafimaadku ku sameeyaa isku talaab uuna shaambadeeyaa.

Kuwan soo socda ayaa shaqeynaaya si wax laguugu soo celiyo:

- *Hadii aad raacayso bas:* Tus warqadda yeedhmadaada wadaha baska, ka dib lacag la'aan ayaad ku raacaysaa. Markaad guriga u safreyso lagac la'aan ayaad ku raacaysaa hadii aad tusto risiidhka daryeel bixiyaha. Hadii aanad haysan warqada yeedhmada, ama aanad rabin inaad tusto ku bixin kaash, tigidhka hayso waxaana taas laga jari karaa kharashka daryeelka caafimaadka.

- *Hadii aad raacayso tareen:* Usoo dir tigidhkaaga iyo warqadaada rasiidhka ah ee aad ka heshay daryeel bixiyahaaga Adeega Socdaalka Waaxda Gaadiidka Gobolka ((Eeg cinwaanka hoos ku qoran).

- *Hadii aad raacdo gaariga adeega ama socdaalka la jiifo:*

Ka dalbo gaari yeedhitaanka adeega socdaalka Adeega Socdaalka Waaxda Gaadiidka Gobolka ugu danbey saacada 15 maalinta ka horeysa. Tel 0775 77 77 00.

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Xadeynta kharashka badan

Socdaallada bukaanka waxa jira xadeynta kharashka ugu badnaan. Haddii aad 1 800 karoon ku bixisay socdaal bukaan muddo laba iyo toban bilood guda hood ah, kolkaa waxa lagu siinayaa kaadhka socdaalka xorta ah. Kaadhka xorta ahi wuxu shaqaynayaa wakhtiga ka hadhay muddeda laba iyo toban bilood.

Marka laga reebo ee aanay ku jirin: Kharashka kuu gaarka ah ee daawada, kharashka baadhidda caafimaadka iyo tallaaladu kuma jiraan habka joojinta kharashka badan.

Inta aad bixinayso

Qayb ka mid ah kharashka socdaalka waa inaad adigu bixiso

Nooca gaadiidka	Inta aad bixinayso kr
Gaadiidka kugu xira taraanka, baska iyo linéan	0
Bas, taraanka gobolka kronoberg gudahiisa	0
Bas, taraanka goboha ka baxsan kronoberg gudahiisa	20
Diyaarad	200
Linnéan	0
Gaari gaar ah, hal safar	100
Gaariga shaqada, musaafir fadhiya	100
Gaariga shaqada, musaafir jiifa	100
Safarka ambalansaha (la qorsheeyay)	200

Ku soo dir cadeymahaaga (tigidhka, rasiidhka daryeel bixiyaha, warqada yedhmada) si aad kharashka u hesho:

Serviceresor

Videum

351 96 Växjö

Su'aalaha ku sabsan gaadiidka bukaanka

Service transportation

Tel 0470 194 04